# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

**Kal-fadhigii 40$^{aad}$ Fadhiyadii 2$^{aad}$ iyo 3$^{aad}$**

**Isniin & Salaasa 24 & 25 June 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Ajandaha Kal-fadhiga 40$^{aad}$ ee Golaha Wakiilada

**Md. Cabdi Maxamuud Jaamac** **(3min 05sec):-** Waxaan salaamayaa dhammaan mudanayaasha. Waxaan ku bilaabi lahaa xeerka 2aad ee xeerka doorashoooyinka wax allaale wax u diyaar ahi ma jiro, markaa waxaan leeyahay xeerka doorashada dib ha loo dhigo.

Labada xeer ee 9aad iyo 10aad ee sahaminta iyo baadhista shidaalka waa muhiim, waxaan odhanaa lahaa labadaasna ha la soo qadimo. Waan ka baxay.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(3min 01sec):-** Xildhibaanada, Shir-guddoonka, Kaaliyayaasha iyo saxaafada Assalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Guddoomiye waxaan anigu doonayaa in aan ugu horaysiiyo xeer halkan ka maqan oo shalayto xildhibaanada intooda badani ka hadleen. Waa xeerkii Golaha lagu maamulayey ee ahaa Xeer-hoosaadkii.

Guddoomiye waxa looga hadlayey waxay ahayd in anshax marinta xeer-hoosaadka ku jirta marka uu xildhibaan xilkiisa gabo, wixii lagu ciqaabayey sidaas ayey ahayd taasi taas weeye.

Waxaan aad u bogaadinayaa anigu in kasta oo xildhibaankii iga horeeyey uu yidhi dib ha loo dhigo, waxaan soo jeedinayaa in xeerka doorashooyinka koowaad laga dhigo. Maalin dhawayto koomiishanka ayaa waxay soo bandhigeen diiwaangelintii hab cusub oo ay sameeyeen oo aad loo jeclaystay oo aad u qurux badnaa, markii lana tusay waxa kaliya ee meesha ka maqnaa wuxuu ahaa xeerkaa doorashooyinka ee inagu gacanta aynu ku hayno in aynu hirgelino.

Xeerkan kale ha loo galo siday u kala muhiimsan yihiin ee ay u kala horeeyaan xeer hoosaadkana ha lagu soo daro.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yusuf** **(3min 20 sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxmiim. Wacalaa rasuulilahi salalaahu calayhi Wasalam. Guddoomiyaha iyo Xildhibaanaduba way salaaman yihiin. Ajandahani waxba kama duwan kii hore waa isku mid, kaliya waxa

lagu soo kordhiyey xeerkan Garyaqaanka Guud, xeerka Doorashada oo 8-deedaa ahaan jirayna waxa la keenay kaalinta 2aad. Ma jirto wax badan oo aan ajandahan aan ka bedelayaa, laakiin shaygan la yidhaa doorashadu iyo xeerka xildhibaankii iga horeeyey yidhi ha laga soo dhigo kaw waxaan ku raacsanahay xildhibaankii hore ee yidhi.

Maanta xaalad dalkan ka jira oo doorashooyin loo qabtaa ma jiro, ma dhawa mana abuurna. Waxaan leeyahay horta xaaladii lagu geli lahaa ha la abuuro. Xukuumada meesha joogta haddii ay dagaal tahay, haddii ay saami qaybsi tahay hadalku maanta wuu fara badan yahay. Dagaalaa dhac dhacaya kalsoonidii umadda oo dhami way kala dhacday laba xisbi ayaanu doorasho ku galaynaa wax allaale wax ka suurto gelayaa ma jiraan. Haddii aynu golahan nahay waa in aynu danta qaranka ka talinaa.

Waxa kale oo dhan aynu ka hadalno oo aynu ka doodno,laakiin marka xeerka doorashada aynu ku celino 8aad iyo 9aad oo marka xukuumadu inteeda qabato oo saami qaybiga la dhameeyo aynu ka hadalno oo ka doodno inta ka horayso halkiisa ha iska yaalo.

**Marwo. Baar Siciid Faarax** **(4min 25sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Assalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu. Bacda salaan. Xeerka Ismaamulka Degmooyinka iyo Gobolada Xeer Lr. 23 ajandihii horena wuu ku jiray waa sax oo fasax aynu galnay. Xeerka doorashooyinka waxaan u malaynayaa doorashooyinkaasi in aanay muuqan maanta, marka la eego xaalada oo wakhtigii doorashada la qabtay waxa ka hadhsan lix bilood, diiwaangelin iyo doorasho laga gaadhsiin karaana ma jirto diyaar cid u ah oo inoo muuqataan ma taalo, taasi waxaan u malaynayaa waa iska ruwaayad la dhigayo, markaa kaas meesha waan ka saari lahaa.

Waxaan soo gelin lahaa xeerka xaqsiinta ciidanka 2aad oo wax badan ka tari lahaa dad badan oo soo shaqeeyey oo dulman. Si looga doodo oo loo ansixiyo.

Xeerka garyaqaanka guud waa sax. Wax ka bedelka iyo kaabista xeerka tamarta waa sax, Xisaab xidhkii 2017 oo Iyana mar kasta ku jiro, markaa waa inagu ceeb in xsiaab xidhka la doon doono, anigu koowaad ayaan ka dhigi lahaa xisaab xidhka 2017.

Xeerka maydhida lacagta waa in isna la geliyaa meelaha hore ileen kalfadhi kasta wuu ku jiraaye.

Xeerka macdanta dadkii ayaa isku dilaya oo walaahi anigu kaas waxba ka garan maayo

Xeerka sahaminta shidaalka wuu ku jiray ilaa maalintaynu golaha soo galnay waa ilaa qiyaamaha shidaal la soo saarayna maynu arag.

Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen wax kasta waxay u baahan yihiin sharci uu ku socdo, waxaan leeyahay si shaqadeenu u wanaagsanaato waxaan ku soo darayaa xeer-hoosaadka Golaha. Waxa kale oo aan ku darayaa xogogaal u noqoshada xaalada dalka oo aad moodo inay wax badani is dhaaf dhaafeen.

Waxa kale oo aan ku darayaa xildhibaanada siiba kuwa laga soo doortay Gobolka Sanaag iyo sool in loo diro Goboladii. Waliba Sanaag hawlo badan ayaa jira, kaana waxaan leeyahay waa in xildhibaanada loo diro goboladaa ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** **(12min 10sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenka, Xildhibaanada, Xoghaynta iyo Martida dhammaan waan idin salaamayaa.

Anigu saddex qodob oo koob kooban ayaan ka hadlayaa. Horta marka hore intaanan gelin waxaan ku raaco Mudane xildhibaan Baar Siciid Faarax fariintaa ay soo jeedisay ee ah Xildhibaanada gobolada bariga, si ay barigii xogogaal ugu noqdaan xaadalaha ka jira xalka loo raadinayee xukumadu gacanta ku haysana qayb uga noqdaan in shir-guddoonku u ogolaado inay goboladii soo booqan karaan. Kalmada ha loo diro aniga oo xildhibaanka ixtiraaaya waxaan ku bedeli lahaa inaynu isu dirno kana codsano shir-guddoonka.

Saddexda qodob ee aan galayaa waa

1. Xeerka Doorashooyinka.
2. Qaraarkii ahaa siyaasiyaanta ka qaybgala Soomaaliya
3. Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada.

Anigu waxaan qabaa in qodobka koowaad ee ajandahan laga dhigo xeerka doorashooyinka (1 seconded).

Waanan sababaynayaa Gudoomiye iyo xildhibaano. Waxa la yidhi fulay xantiisa ma moogee. Muddo badan waxaynu maqlaynay dadweyne iyo siyaasiyiin ka hadlaayey in golahii fadhiyo muddo dhaaf oo ah 14 sanno. Umalayn maayo in qof inaga mida oo kursiga sii jeclaysanayaa inuu jiro. Waxaan aynu ka hadlaynaa waa xag farsamo waanan sababaynayaa.

Waxaan qabaa in afartii ay ku qodonto doorashadu.

1. Rabitaanka siyaasiga ah ee ka imanaya Xukuumada ee uu gadhwadeenka ka yahay Madaxweynaha Jamuuriyadda Somaliland Mudane Muuse Biixi Cabdi. Rabitaankii siyaasiga ahaa madaxweynuhu goob allaale goobta uu isa soo taago wuxuu ku dhawaaqay inay doorashadu wakhtigeeda ku qabsoo- mayso. Dadkaa cararay lama soo qabano karo, laakiin xoolo kaa cararaya waa la soo qaban karaa. Qodobka koowaad ayaan ka dhigay xeerka doorashada.

   Waxa la diyaariyey dhammaan lacagtii ku bixi lahayd, laakiin wax ka maqan oo ka cararaysa cid.

   Arrinta saami qaybsiga waa in aynu inagu qayb ka noqonaa oo Madaxweynuhu kaligii qaban maayee aynu la qabno, haddii doorasho dib u dhacdo inaguna qayb ayeynu ka noqonaynaa cida diidana qayb ayey ka noqonaysaa.

2. Waxaan ka hadlayaa qaraarkii ku saabsanaa siyaasiyiinta Sooomaaliya tagta, qaraarkaa waxaan doonayaa in lagu soo daro ajandaha, waxaanan ku sababaynayaa.

   Waxa jirta hal arrin oo muhiim ah oo qaraarkaas ka maqnaa. Waxay ku saabsan tahay siyaasiyiinta halkaas tagta markay sanado ka soo ololeeyaan inay ka soo horjeestaan jiritaanka iyo qaranimada Somaliland. Maalinta ay halkaas is afgaran waayaana ay sida caleenta u soo dhacaan ayey halkan yimaadaan iyaga oo aan raaligelin ka bixinayaa.

   Saddex siyaasi oo waaweynoo fadaraal ku ololaynayey ayaa xagan inoogu yimid, may samayn wax la yidhaa raaligelin. Mid labaad ayey ku sii darsadeen, waxay ku darsadeen inay dadkii kala qaybiyaan oo ay yidhaahdaan Somaliland lama wadalaha oo la yidhaahdo waa la tabliiqiyeeyey, raaligelin kamay bixin. Waxaan leeyahay adeerkay Cali Khaliif galaydh, Axmed Ismaaciil Samatar iyo Ismaaciil Buubaa inay raaligelin ka bixiyaan intii ay Somaliland ka soo horjeedeen. (Seconded).

3. Saddexaadna waa xeer-hoosaadka oo gacanta loo taagay, xeer-hoosaadkaasi wuxuu ku sharci garaboobayba go'aan gole oo waxa gacanta u taagay 58 mudane. Waxaan kaa codsanayaa guddoomiye in saddexdaas siyaasi raaligelin bixiyaan in lagu soo darro ajendaha.

**Md. Faarax Maxamuud Cabdille** **(3min 10sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, sharciyada halkan lagu soo qoray waan taageersanahay, gudoomiye iyo mudanayaalba waxaan u arkaa in ay caadi yihiin oo hadii aynu ka gaadhsiino la wada ansixiyo, lakiin waxaa halkan ka maqan oo aynu awal ajandayaashii hore ku soo dari jirnay xog-ogaal u noqoshada xaalada dalka, aniga oo qaba in uu maanta ugu khatarsanyahay dalku halka uu marayo, markaa waxaan qabaa in lagu soo daro Ajandaha *(7 mudane ayaa taageeray)* madaama oo uu golahani yahay gole siyaasadeed waxaa loo baahan yahay in ajanduhu aanu kaliya noqon mid xeerar kaliya lagu ansixiyo ee waa in uu wax ka ogaadaa xaaladaha dalku marayo hadii ay noqon lahayd dhaqaale, nabad-galyada, siyaasada iyo in siyaada la toosiyo sida uu dastuurku dhigayo.

Waxaa kale oo aan leeyahay aniga oo mudana ku ixtiraamaya fikirkiisa waxaan leeyahay halkan loogama baahna nin cid shaashada iska tusa ee waxaa la inooga baahan yahay in aynu qarankan u shaqayno hadii cid fariin halkan looga dirayana waa in kaliya dadweynaha looga diraa fariin halkan ayaan leeyahay. Wasalaamu calaykum.

**Md. Cabdiraxmaan Muuse Jaamac** **(2min 11sec):-** Shirgudoonka iyo Mudanayaashuba way salaaman yihiin, Xog-haya guud iyo shaqaalahana waan salaamayaa anigu qodob aan laga hadal ayaan ka hadlayaa oo maalin dhawayd nin xildhibaan ah ayaa la qabtay oo la xidhay isaga oo xasaanadiisii wata waxaanu xidhnaa mudo bil ah iyada oo ay ku soo socoto kuwa kalana, sidaa awgeed waa in ajandaha lagu soo daraa sidii arrintaa looga

hadli lahaa, ka mudanayaal ahaan waxaan qabaa in aynu doorasho diyaar u nahay, sidoo kale in xeerkaa ay ka dhinayd qodobka saami qaybsigu iyo asxaabta oo aan wali ku heshiin, waxaanan qabaa in uu golaha diyaar ka yahay in kastoo uu wakhtigu cidhiidhi yahay.

Waxaa kale oo aan leeyahay xog-ogaal u noqoshada dalka waan in ajandahay lagu soo daraa waayo intaa waxaynu maqalaa askar ayaa baxday cid ayaa la dilay waa in ajandaha lagu soo daraa oo qodobka 3aad laga dhigaa

Qodobka 4aad xaqsiinta ciidamada waan in aad loo dadajiyaa waayo cida aan ku fadhinaa waa iyaga oo iyagaa ayaa dhib oo dhan inoo mutay, *sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in qodobka 1aad laga dhigo ayaan soo jeedinayaa*.

Sidoo kale xeerarka shidaalka waa in xaga hore la soo mariyaa waayo shaqada qolooyinkaa macdantu hada way socotaa oo meelaha qaar wey bixiyeen, waa in xeerarkii ay ku hawl gali lahaayeen la helaa, tusaale ahaan maalin dhawayd oo aan eeriboodka tagay ayaa waxay ii sheegeen in ayna hayn wax sharciya oo ay ku qabtaan macdantaa la dhoofinayo ayay ii sheegeen waanad mahadsantihiin.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise** **(3min 22sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka iyo mudanayaashuba way Salaaman yihiin, mudane Gudoomiye sidan uu Ajanduhu uu hada u qoran yahay ee qodobka 1aad laga dhigay Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka sidiisa ayaan u daynayaa, waxaa kale oo aan raacsanahay in xeerka doorashada uu isna xaga hore uu soo maro, xeerarka kale ee macdanta iyo shidaalka iyagana waan taageerayaa in la soo horumariyo ayaan leeyahay, guud ahaana waxaa marba la soo horu marinayaa hadba xeerkii diyaar ah.

Waxaa kale oo aan ku raacsanahay sidii mudanayaashii horaba soo jeedinyeen in *Ajandaha lagu soo daro Xog-ogaal u noqoshada xaalada dalka,* waxaa kale oo aan leeyahay mudanayashu marka ay doodayaan fikradahooda waa u xor ee yaanu nina nin ka daba hadlin waayo dad ayuu matalaa.

**Md. Cabdiqaadir X. Ismaaciil Jirde** **(4min 05sec):-** Gudoomiye waad mahadsantahay, waxaan salaamayaa xidhibaanada, saxaafada martida, mudane gudoomiye waxaan jecelahay markaynu Ajandaha ka doodayno in aan xisbi halkan lagu soo hadal qaadin ama xisbi aan halkan laga dhaleecayn adiguna aad ka qabato hadii ay taasi dhacdo, hadii kale waxay inagu noqonaysaa weerar iyo weerar-celin.

Anigu maanta halka xisbina uma joogo xisbina u hadli maayo Ajandaa I horyaala kaas ayaanan ku ekaanayaa, markaa hawsha ugu wayn ee uu maanta qarankani sugayaa waa doorasho, doorashadaa oo ay duruufo ku gadaaman yihiin, iyada oo aynu maanta ka warhyno duruufahaa oo aynu ognahay waxa iska baddelay Gobolkii Sanaag oo tacab badan la galiyay sidii doorasho uga dhici lahayd iyada oo rajo weyna laga qabay in aynu

intii hore iyo in ka badanba aynu ku fidno, maantana waxaa muuqda in gobolkaa wax badani iska baddeleen isku xidhkiisii iyo nabad-galyadiisiiba aanad moodo in maanta la inla qaybsanayo oo la soo fidayo oo dadka fikirkoodii uu is badalayo.

Markaa waxaa haboon in wararka aynaan idaacadaha uun ayaynaan ka heline waxaynu nahay golihii 1aad ee Xeer Dejinta ee waa in aynu xog-ogaal aynu u noqono oo aan la inooga waramin oo aynu war wanaagsan ka helo.

*Waxaan soo jeedinayaa in wasaarada arrimaha Gudaha loo yeedho oo ay ka warbixiso Xaalada gobolka Sanaag ama sanaag barri iyo gobolka Soolba,* ciidamaa goostay oo waxbadan ayaa is badelay oo meeshaa maanta doorasho iyo diwaan galin la soo hadal qaadi karaa ma jirto ilaa aynu xog helo.

Xeerka doorashadu inaga ayuu ina horyaalaa kaligeena inama khuseeyo ee dad badan ayuu khuseeyaa komishankuna warbixin ayuu soo saaray, 6 qodob oo aan la'aantood aanay doorasho dhacayn ayay sheegeen ama caqabado hortaagan ilaa laga qaado, caqabadahaa waa in aynu wax iska weydiino mala bilaabay, mala dhadhaweeyay, ma laga gaabiyay iyagana waa in aynu wax ka ogaanaa, sida looga *waa in komishanka loo yeedhaa oo la yidhaa halkay wax idiin marayaan oo cid walba intii ay ku lahay ma loo dhiibay waa in aynu taasna ogaanaa.*

Xeerarka intooda kale waxaan qabaa in sida ay u diyaarka yihiin loo soo kala horaysiiyo, *anigu se waxaan qabaa in labadaa hay'adoon loo yeedho oo aynu xogogaal u noqo ayaan leeyahay* waxaanan leeyahay guusha soomaliland waxay ku xidhantahay in ay labadaa gobol ay doorasho ka dhacdo waanad mahadsanyihiin.

**Md. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte)** **(6min 14sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiye xidhidhibaanada sharafta leh iyo martidaba dhamaan waan salaamayaa; anigu waxaan qabaa in aynu aad isku dhuubno oo aynu ku ekaano ajandaha sida loo soo kala horu marinayo iyo hadii ay wax ka dhiman yihiinba wax lagu kordhinayaba, Gudoomiye waxaan codsanayaa in wixii mawaadiicda ka baxsan ee ajandaha ka baxsan in aan xildhibaanka aad ka joojiso, sidoo kale waxaan xildhibaanadana ka codsanayaa in la is ixtiraamo waayo qof walba xisbi ayuu ka tirsanyahay oo waan in aaraadiisa loo daayaa hadii ay kula qaloocato iyo hadii kalaba.

Waxaa kale oo reeban in halkan ama fagaarahan cid farta lagu fiiqo oo inaga oo mawduucan ku jirna xisbiyo iyo wax kale laga hadlaa in aanay la jaan qaadayn mawduucan ina horyaala, markaa mudanayaal waa in aynu inagu is xakamayno waayo in badan ayaynu golahan fadhinay oo weynu garanaynaa nidaam kiisa'e.

*Marka ugu horaysa waxaan taageerayaa mudanayaashii soo jeedinayay in xeerka doorashada qodobka 1aad laga dhigo* doorashadu in ay dhacayso iyo in aanay dhacayn waa wax kale waayo inagu doorashada ma qabano ee waxay u taalaa Xukuumada, komishanka iyo

Xisbiyada Qaranka qabsoomideedana duruufaha ku gadaaman sida looga midho dhaliyo ayay ku koobantahay, ka gole ahaan waajib distooriya ayaa ina saaran oo ah in aynu Xeerkii dhamaystirno waxaana loo turjumanayaa in aynu ka caga jiidayno hadii aynaan xeerkaa dhamayn oo aynu halkan jeclaysanayno fadhigeeda.

Doorashadaa hadii aan la qabana maanta dhaawac wayn ayay ku noqonaysaa Somaliland, hadii aynu qabanana waxay inoo noqonaysaa sumcad wayn oo wixii shaki ku jiray uu ka baxayo meesha, markaa anigu waxaan qabaa in ayna doorashada caqabadaha hor taagan in aanu golahani ka mid noqon oo xeerkaa aynu dhamaystirno oo xeerka qodobka 1aad laga dhigo.

Waanan aaminsanahay in aanu xeerku dhamayn oo qodobkii ugu mihiimsanaa ee uu intaa golaha u yaalay aan wali meel la saarin, laakiin mar hadii gole ahaan aynu u gudbinay madaxweynaha 3 sano ka hor oo madaxtooyada ka soo noqday waxaan qabaa in aynu xeerka intiisa kale la dhamaystiro mooyaane in saami qaybsigu gole ahaan inoo oolin.

*Waxaa kale oo aan ku xijin lahaa Xeerka tamarta,* waayo tamartu dhibaato weyn ayay ku haysaa dadweynaha ilaa 19 sanadood ayay korontadaasi shaqaynaysay oo guryo gubaysay oo dad laynaysay oo ay dhibaato balaadhan ay ku haysaa magaalada, markaa waa xeer si toosa u taabanaya dadweynaha in door ahna wuu inala yaalay ee wixii farsamo ahaan ka qaldan aynu saxno oo is dhaafino ayaan odhan lahaa.

Waxaa kale oo aan leeyahay xeerarka sida ay u kala fudud yihiin ama ay u diyaar yihiin aynu u sii dayno oo aynaan xeer mudo dheer qaadanaya ayaynaan soo hor marin.

*Waxaa kale oo aan 3aad ka dhigi lahaa xeerka xaqsiinta ciidamada Somaliland,* waan ka warqabnaa oo dalka dhibaatooyin badan ayaa ka jira oo ay ka mid yihiin colaado inagu soo waajahan ama taagan oo dalka gudihiisa waxaad moodaa in meelo badan nabadgalyada uu war-war ka jrro, markaa waxaan leeyahay yaan xeerkaa laga reebin kal-fadhigan waayo ciidamada wax wayn ayuu u tarayaa oo uu niyada u dhisayaa.

Xeerarka kale waxaa jira xeerar aad u complicated ah oo halkan ku jira oo inaga iska daaye aduunyada sanado qaata in laga shaqeeyaa waxaana ka mid ah xeerarka shidaalka laakiin waxaan soo horaysiin lahaa *xeerka Macdanta oo aan 4aad ka dhig lahaa.* Waayo waxaad moodaa in ay macdantiina ka mid tahay wax yaabaha haatan nabad galyo darada abuuraya gaar ahaan gobolada bariga oo markoodii horaba nabadgalyadoodu aanay sax ahayn.

*Sidoo kale qodobka 5aad* waxaan ka dhigi lahaa xeerkii in badan doodiisa aynu ku raagnay ee ahaa *is maamulka gobolada iyo degmooyinka ayaan ka dhigi lahaa* iyada oo aanan ilaa hada ku arkayn wax deg-deg ah oo ku jira hadana wax badani umay hadhine isaga waa in aynu is dhaafino ayaan qabaa.

Intaa marka laga yimaado mudane gudoomiye shalay waad naga maqnayde halka golaha hoosta ayaanu ka soo xidhanay waananu is dhaliilaynay waayo waxaa la dareemay cago jiid iyo caajis guud ahaan golahan saaran waxaanan qabaa in sidii wax looga qaban lahaa ay xeer-hoosaadka ku ururayaan ayaan qabaa, waxaanan qabaa in ay shirgudoonku sidiisa u dabaqaan, sidoo kale waxaa iyana jirta sidii uu sheegayay mudanihii iga horeeyay in uu xeer-hoosaadka wali mugdi inagaga jiro oo xeer hoosaadkii aynu u codaynay ayuun baa shaqaynaya ilaa la helayo mid badalaya oo aynu u codayno, waxaa kale oo aad ogaydeen in ay dhibaato ka dhacday oo la ina dhexdhexaadiyay waana in qodabadaana lagu daraa xeer hoosaadka, sidaa awgeed waxaa uu u baahanayaa in wax-ka-beddel lagu sameeyo.

Waxaanan qabaa in kal-fadhigan ayunu wakhtigu uga samayno, mana lihi ha laga soo horumariyo xeerarka hada ina hor yaala, waayo xeerarka ina horyaalaa waa xeerar muhiim ah una baahan in la ansixiyo.

Sidoo kale waxaan ayid sanahay in mudanayaasha gobolada bari fursad loo siiyo bal inay ku noqdaan meelihii laga soo doortay iyaga oo wada socda si xaalada dhabta ah ee ka jirta ay wax ugu soo ogaadaan golahana uga soo waramaan wixii talo iyo toosin ahna ka soo qabtaan waanad mahadsantihiin.

**Md. Maxamed Faarax Qabile** **(7min 10sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Xoghayntuba waad salaaman tihiin, Rayte halkan wuxuu ka yidhi hadii issue la xiisaynayaa jiro Goluhu cagajiidka muu galeen, waxaad moodaa inaynaan dhuunta u sii dayn xaalada dalku marayo iyo kobaca aynu ku samayn lahayn ajandahan laftiisa si uu u noqdo mid nuxur xambaarsan ee aanay kaliya ahayn inaynu Xeerar sii dayno, anigu waxaan qabaa xaalada dalku qiimayn bay u baahan tahay, waliba maaha xog-ogaal u noqosho kaliya waan ku raacsanahay Mudanyaasha soo jeediyay in Gobolada duruufaha gaarka ah ee soo ifbaxaya ka taagan yihiin in Xildhibaanadooda Shir-gudoonku u siiyo fursad ay ku guryo noqdaan, marka Xaaladu dalku waxay u baahan tahay qiimayn si aad loogu sameeyo haday noqoto arrimaha amniga, haday noqoto arrimaha siyaasada iyo haday noqoto arrimaha doorashooyinka, dhibaatooyinkuna kuma koobna oo kaliya meel ee dhibta sanaaag ka dhacda Gabiley way khusaysanayaan oo gogol baynu kuwada fadhidnaa.

Sidoo kale, waxaan ayidayaa mudanayaasha soo jeediyay in loo yeedho Komishanka Doorashooyinka si wax looga waydiyo dhibaatooyinka mugdiga galiyay doorashooyinka, Wasaarada Arrimaha Gudaha lafteeda in loo yeedho ayaan soo jeedinayaa, waxa kale oo mudanayaasha ka codsanayaa is yeel yeelka inaynu dibada kaga nidaamdno xaalada dalku halkay marayso marka loo eego, waana in aynu halkan la nimaadno mudakarnimadii ay inaga mudnaynd kuraastan aynu ku fadhino oo dadka wax looga celiyo.

Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmoyinku Xeer aad loogu faygaray buu ahaa oo mushkiladiisu aad u dheeraatay, Xeer Gudiddu lifaaqeeda mugii loo baahna inay galiso mid ka badan galisay buu ahaa, waxaynu u baahanahay inaynu siyaasada looga baahan yahay marka hore wax ka badalka iyo kaabista ee laga leeyahay uu cad yahay, Xukuumada danaynaysay In wax laga badalo Xeerkan, mida kale wax walba waa inay sargooyo la yeeshaan sida uu dhigayo Dastuurka Qaranka Qodobkiisa 28aad inuu yahay Xeer dastuurku dhalo, laakiin maaha  nuqul bayjaj khilaafsan dastuurka oo aan ku salaysnayni inuu meesha ka soo baxo, hadii kale sida Qodobka 28$^{aad}$ dhigay wuxuu noqonaya waxba kama jiraan (null and void).

Wax iyana ayaamahan dambe soo ifbaxaysa culays lagu soo kordhiyay cashuur rar oo aan ahayn dakhligii caadiga ahaa ee macaashka laga heli lahaa, laakiin waxa jirta in mudo maraakiibtii la isku xanibnaa oo maalin walba xal yar iyo gudi yar oo ku meel gaadh ah loo dirayo Berbera, marka waxaan leeyahay cashuuraha noocaas ah ee sida uu dhigayo Qodobka 54aad, tacriifadaha iska socota oo markasta qalinku ku dul fakarayo sidii dhaqaale loo kordhin lahaa oo aan marnaba loo eegayn dantii dadka sida Qodobka 14aad ee dastuurku sheegayo iyo dariiqyadii dhaqaalaha loo kordhin lahaa oo meel wax soo jiidata aynu u noqon lahayn dee maaha inay diidmo keento, madaxweynuhu wuxuu maalin dhowayd dadka Reer Berbera ku canaanayay inay dadka soo jiitaan, anigu ma garanayo dee doorasho gaar ah oo reer Berbera ay doonayaan laakiin waxaynu u baahanahay dabeecadaha wax soo jiidanaya inaynu la nimaadno ee Qarankan wax didinaya ee culeyska saaraya dadkii dhibaatuu leeyahay, marka waxyaabaha dambe ee aan Golahan ka bixin ee culeyska keenay waxay u baahan tahay in cagaha loo dhigo oo dib loogu noqdo.

Arrinta doorashada inaynu soo qadino waynu u baahanahay oo qadhaadh iyo macaan waxay dhadhamayso inuu Golahani si caadiya u lafa guro ee aan khayaali la dul cararin iyo is tuur tuur meelo wax la isu soo faro, waxa fiican in caadi loo wajaho hadii ay qabsoomayso iyo hadii aanay qabsoomaynba si halkan wax runa ugaga amba baxno ayaan soo jeedinayaa, qodobadan kale sida qodobka doorashada la leeyahay xan iska fogayn iyo ceeb iska dhowr maaha in wax laga qabtu u baahan yahay, sida ay dawladu maanta ula fududahay ama ay leedahay waanu qabanaynaa doorasho laba xisbi ah waa arrin xasaasi ku ah Qaranimaada Somaliland oo sensative ah nabadgalyada xumadaynu ka hadlaynana xoojiya, marka waa inaynu arrimaha ina horyaal si macquula u wajahnaa.

**Md. Naasir X. Cali Shire** **(4min 22sec):-** Bismilaahi, Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha sharafta leh Asc, waxa ii muuqata inay Xildhibaanadii daaleen anigana labadii Xildhibaan ee iga horeeyay wakhti badan bay qaateen laakiin anigu aad baan u soo koobayaa.

Anigu waxaan ka eegayaa dhinac aanay Xildhibaanada kale ka eegin oo ah arrin ku saabsan in dhaqaalaha la kobciyo, koboca iyo nidaamka dhaqaale waxa jira Xeerar khuseeya oo u baahan inaynu ku soo darsano ajandaheenan waayo khilaafka laga hadlayo iyo nabadgalyadu dhamaan waxay ku salaysnaan karaan hadii qarankani dhaqaalaha kobciyo oo aan qaba hadii dhaqaaluhu kobco in laga baxayo, waxa inaga maqan Xeerkii Ganaciga Baananka oo Golahan dhowr jeer lagu soo celceliyay markii dambena la freeze-gareeyay, marka waxaan soo jeedinayaa in ajandahan Gudoomiye xeerkii Golahani qoray ee Ganaciga Baananka dib loo soo celiyo.

Waxa kale oo aan soo jeedinaya arrinta ku saabsan Xeerarka qodobka 9aad, qodobka 10aad iyo qodobka 11aad saddexdaas Xeerba oo khuseeya macdanta, qodista shidaalka iyo dakhliga shidaalka iyana inay qaranka muhiim u yihiin oo muhiim u yihiin waxyaabaha qaranka meelo badan nabadgalyada wax u dhimaya, marka xeerarkii lagu kala bixi lahaa ee ku saabsanaa shidaalka iyo macdanta in la soo hormariyo ayaan soo jeedinayaa.

Arrinta saddexdaad ee meesha ka maqan waa xeerka lacagta electronicka, xeerkaas oo lagu xusayo qaabka loo maamulayo Zaadka iyo lacagta electronicka ah oo baryahan dambe iyaduna keentay muran iyo waxyaabo farabadan oo ku saabsan lacagahan lagu isticmaalo kuwaas oo aduunka oo dhami xeerar u sameysteen, markaa anigu waxaan qabaa saddexdaas Qodob inay yihiin saddex qodob oo dhaqaalaha dalka iyo qaabka maaliyadeed wax ka badalay ee u baahan in lagu soo daro Ajandahan.

Tan u dambeysa ee aan ku soo gabo-gabaynayaa wax weeye mid aan ku taageersanahay xildhibaanada oo ah Siyaasiyiinta reer Somaliland ee xamar qabta ama somaaliya taga, waana arrin soo baxday baryahan in ninku intuu tago soo shaqaysto oo qaranka dumiyo marka u dambeeya yidhaahdo hala I cafiyo, marka iyadana waa in lagu daro qodobada ajanadahan inuu ninkaasi yahay khaa'inul wadan oo aan la cafinin.

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan** **(8min 33sec):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Asc, waxaan ku raacsanahay Gudoomiye horta xildhibaanadii soo jeediyay ajandaha in lagu soo daro in laga hadlo xaalada guud ee dalka, Gobolka Sanaag bari ee hada laga hadlayay dhibaatadiisu maaha mid inaga gudaheena ka bilaabmaysa ee waxa jira faragalin badan oo dawlada federaalka ama puntland ama arrimo siyaasi ah oo meelo kale ah, waayo hadaad eegto halka wax ka

bilaabmeen ama waxyaabaha qarxiyay wax ka mid ah Ciidamo tuulo Ceergaabo duleedkeeda ah oo Yube la yidhaahdo oo ah tuuladii C/qaadir Jaamac Xaamud oo ciidan Somaliland ahi tagay oo la yidhi yaan la keenin bay ka bilaabmeen.

Waynu ogayn inta jeer ee Ciidamadeenu gudaha aad ugu fogaadeen sanaag bari oo magaalooyin aad u fog oo duleedka puntland ah tageen cidina aanay ka qaylin, marka arrintaas ka socota Gobolka Sanaag waa mid siyaasi ah oo aynu baahanahay inaynu fahamno mushkiladaas siyaasiga ah ee lagu colaadinayo Somaliland oo dawlad federaal ama puntland oo aynu isku dhacdnay oo inoogu ciil qabta arrintii tukaraq ay wadaan weeye, marka arrintaan u leeyahay aynu u xog-ogaal noqono waxa dalkeena ka socda si aynu qiimayn dhab ah u sameyno, ra'yi wanaagsan weeye sida la soo jeedinayay in Xildhibaanada Gobolada bari in la diro oo hawshaas waxay ka qaban karaan ka qabtaan ugu yaraan la iman karaan sida wax looga qaban karo iyo sida loo wajihi karo arrintaas.

Ajandahan sida la soo jeediyayba Qodobka doorashooyinku waa inuu yimaado qodobka kowaad, waayo waxaynu gole xeer-dejineed iyo siyaasadeed xisbiyada is hayaa Golahanay ka mid yihiin, waxaynu qayb ka noqon karnaa xalka oo si ay xisbiyada iyo xukuumadu isu fahmi lahaayeen Golahani kaalin buu ka qaadan karaa, ma aqbalayno doorasho laba xisb ah, mana aqbalayno shisheeye intay maanta yimaadaan ina heshiisiiyaan, inaga heshiin karna, marka Golahani ha ka hawl-galo sidii uu xisbiyada iyo arrintay isku hayaan isugu soo jiidi lahaayeen, sidoo kale waan taageersanahay in loo yeedho Gudidda doorashooyinka, mushkiladaha ka tagaan doorashooyinkana haday tahay saami-qaybsi ama heshiisiin dhinacyada xisbiyada is haya kaalin baynu ka qaadan karnaaye aynu isku diyaarino waayo halkanay xisbiyadii wada joogaan ee madaxtooyada ma wada joogaan oo iyadu dhinac kaliya, doorashadu Somaliland kama wada dhici karto horena ugama wada dhicin, iminka intay ka dhici karto inay ka dhacdaa loo baahan yahay.

Markaan kala horeysiinta Galo waxaan u kala horaysiinayaa sidan;

1. Xeerka Doorashooyinka
2. Xeerka Macdanta Somaliland oo mushkilad ka taagan tahay, xalna u noqonaya arrimahaas.
3. Xeerka Xaqsiinta Hawl-gabka Ciidamada
4. Xeerka Sahminta Shidaalka

Markaa Gudoomiye, Xeerarkani sidaas ay u kala muhiimsan yihin aynu u kala horeysiino, Arrimaha Siyaasiga ahna kaalin aynu u banayno oo hadaad shir-gudoon tihiin mushkiladaha taagan sidii Goluhu qayb uga qaadan lahaa haday tahay dhibaatada bariga ka jirta iyo haday tahay dhibaatada is afgaran waaga xisbiyada ee doorashada, marka kaalinteena aynu ka qaadno arrimahaas, Xeerkaasna aynu iska du'no oo yaan la odhan Golaha Wakiiladu Xeerkii buu dib u dhigayaa, halkii la isla marayoba ha la isla maree, WSC.

**Md. Maxamuud Ismaciil Xasan** **(6min 55sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo marti-sharaftaba waxaan idinku salamaayaa Asc, Shir-gudoonka iyo Mudanayaal, Golahan waajibaadkiisa waxa ka mid ah inuu ka doodo, inuu go'aamo ka soo saaro Xaaladaha dalka oo waajibaadkiisa ayay ka mid tahay, sidaa daraadeed waxaan soo jeedinayaa in ajandaha loogu horeysiiyo Qiimaynta Xaalada dalka, siiba Gobolada bari waayo waxaad moodaa inay ka sii darayaan maalinba maalinta ka dambeysa calooshaada qaydhiin looma qariyo maalinba marka ka dambeysa waxaad mooda in isbadal ku imanayo oo ay ka sii darayaa, marka aynu ugu horeysiino oo waliba go'aano ka soo saarno ee inta laga doodo yaan la iska tuurin.

Waxaan ku xejinayaa sharci muhiima oo halkan wax ka badal lagu keenay oo ah Xeerka Is maamulka Gobolada iyo Degmooyinka, sharcigaasi waa muhiim oo doorashaduu qayb ka yahay, dhibaato badana way ka taagan tahay, Golahana wuu ka baxay oo Gudi gaar ah baa haysay in la soo dhamaystiro, marka kaasna qodobka labaad baan ka dhigayaa.

Qodobka saddexaad waxaan ka dhigayaa doorashooyinka, doorashooyinka waxna waa xeer waxna waa duroofaha ku xeeran duruufahaas ku xeeran intooda badan inooma yaaliin, laakiin anigu waxaan leeyahay kal-fadhigan ha inaga baxo oo xeerba la ansixiyay uun maahee in si series ah aynu u galno inagoo si fiican uga fikirayna, kal-fadhigana aanu inala dhaafin.

Xeerka Macdanta dhibaato badan baa ka taagan macdanta waa la guran jiray iminka waa la gurta, dhibaato badana way ka dhacda oo dad baa ku dhintay, marka waxaan leeyahay Xeerka Macdanta isna qodobka afraad ha la keeno oo aynu de-dejino. Qodobka shanaad waxaan ka dhigaya Xeerka Xaqsiinta Hawl-galka Ciidamada isna halkaas aynu dhigno.

Waxaan ugu dambeysiinayaa Gudoomiye, arrinta laga hadlay ee Siyaasiyiinta Somaaliya ka soo noqda, qodobkaas nin dalkiisii u soo noqday oo meeshu tagay

gunteedii soo arkay lama qabo sida la soo jeediyay dib ha loo eryo weeye, marka hadii cafis ku yimaado ha laga aqbalo ayaan leeyahay, Guud ahaan Gudoomiye Golahani sidii ragii iga horeeyay sheegeen doorkiisu maaha inuu xeer ku dul ciyaaro ee siyaasada guud iyo xaaladaha inuu eego oo qiimeeyo weeye, marka arrintaasna aynu doorkeena ka qaadano.

**Md. Maxamud Jaamac Cilmi (Dable)** **(5min 10sec):-** Gudoomiye, Gudoomiye ku-xigeenka iyo Mudanyaashuba waa salaaman yihiin, Gudoomiye horta maaha inaynu ka shaqayno oo kaliya Xeer, wadanka duruufaha ka jira iyo siyaasada qayb baynu ka nahay ee yaynaan u qaadanin uun inaynu nahay niman qaadiyaal ah oo meel iska fadhiye wuxuu dastuurku ina siinayaa in duruufaha siyaasiga ah ee wadanka ka jira aynu ogaano, qayb ka noqono una yeedhno Masuuliyiinta ay khuseyso si ay inoogu sharaxaana waxna uga waydiino.

Qodobka labaad waxa weeye, shalay halkan waxa ka dhacay heshis la leeyahay Xeer-hoosaadkii baanu idinka badalnay, dee kuma taalo xeer-hoosaadka in la inoo yeedhio ee waa inaynu mooshin ku keenaa waajibaadku horta, wixii lagu heshiiyay waa afsomaali, laakiin sharcigii iyo wixii ku yaalay Xeer-hoosaadka horta muu marin, hala kala saaro arrimaha, hadii kale wax kasta waji kale ayuu yeelanayaa, marka Xeer-hoosaadka u yaal Golaha waa inuu isaga ka soo baxa.

Waxa jira, halkan waxa ku yaala oo carabka lagu adkeeyay doorashooyinka, Goluhu waa inuu u yeedhaa oo wax ka waydiiyaa cidda ka masuulka ah, todobadaa sanadood baa la haystay, Maxkamada Dastuurkuna waxay tidhi waa mar kaliya, xisbiyada qaylinayaa iyagaa gobolada siin wayay xuquuq doodii oo afartaas dhexda yaal ku e kaysiiyay, marka masuuliyada xisbiyada leh oo aan anigu, Goluhu waa in inta uu waraaq saxeexo yidhaahdo sidaas ayaa lagu galayaa beelihii wax loo diidanaa samada ha la qabtaana arrinta eh, Masuuliyaada waxa leh Xisbiyada iyo Xukuumada ee Goluhu ma laha, Xeerkaasna todoba sanadood buu la yaalay ilaa Xukuumadii Siilaanyo.

Halkan waxa ku yaala Hawl-gabka Ciidamda, ciidamada kaliya maahee ninka ciidanka ah iyo ninka shaqaalaha dawlada u shaqeeya xuquuq bay leeyihiin, marka waa in iyagana lagu soo daraa oo loo yeedhaa Hay’adda shaqaalaha si loo waydiiyo xuquuqdii shaqaalaha oo iyaguna ay keenaan weeye ee aan la odhan ciidanka kaliya hawl-gab ha loo sameeyo, shir-gudoonkuna warqad ha u qoro Hay’adda Shaqaalaha oo ha la keeno tii shaqaalaha.

Arrinta kale ee meesha taal waxa weeye hadii maalin walba lacag la kordhiyo dee umada inaga ka wakiil ah, ninwaliba shirkad cayntayna intu samaysto uu yidhaahdo Barbera ayaan lacag ka guranayaa waa khalad, waa in inta Gudidda Dhaqaaluhu intay u tagno u yeedho, ay tidhaahdo waa maxay lacagtan la gurnayana ilayn niman bay jeebahadooda

ku dhacaysaa oo khasnada dawladeed ku dhici mayse, marka waxan soo jeedinayaa in Gudidda Dhaqaaluhu intay tagto ka keento wax kasta oo la qaadayo ma ku jiraa Miisaaniyada mise cid kalaa qaadanaysa, waayo lacagtan la qaadayo ee markabka la saarayo waxay ku dhacaysa jooyanta dadka laga iibinayo, Marka Gudoomiye Gudidda Dhaqaalaha iyo Gudiyada kale waa inay doorkooda qaataan oo Wasaaradahaas iyo shirkadaas wax kordhinaya loo yeedhaa oo sharci aynu ka soo saarnaa.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada**
__________________________________

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
__________________________________